

SHARCI LAM. 3 TAARIIKH 13 JANNAAYO 1986:

Wax ka beddelidda sharciga Qareennada.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

✓ QOD. 1aad

Mihnadda Qareennimada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa la madax banneeyey waxaana la baabi'iyey Iskaashatada Qareennada.

QOD. 2aad

Faqradda 2aad, qod. 6aad sharciga lam. 85 ee 21/10/1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

✓ 2. Garsoorayaasha, Barayaasha Kulliyadda Sharciga ee Jaamacadda iyo hawlwaddeennada Qareennimo ugu shaqeyey Dawladda iyo Hay'adaheeda muddo aan ka yareyn 5 sanadood, haystana shahaadada Jaamacadda ee lagu sheegay Xarafka (J) faqradda 1aad ee Qodobkan, waa laga dhaafayaa intixaanka ku sheegan faqradda hore, xarafka (x).

QOD. 3aad

Faqradda 2aad, qodobka 7aad, sharciga lam. 85 ee 21/10/1975 waxaa loo beddelay sida soo socota:

✓ 2. Sharciyaqaanka loo oggolaaday Qareennimada waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Qareennada marka uu baxsho ujuurada gelitaanka Qareennimada oo dhan Shs. 5.000/=.

QOD. 4aad

Qaybta saddexaad, sharciga lam. 85 ee 21/10/1975, dacwadaha asluubta ee ku tilmaaman waxaa qaadaya: Guddiga talo-bixinta iyo Diiwaangelinta Qaareennada oo go'aankoodu kama dambays yahay.

QOD. 5aad

Qodobka 5aad ee sharciga lam. 85 ee 21/10/1975, xarifiiska (x) waxaa loo beddelay sida soo socota:

(x) Qareen uu ka dhex magacawdo Qareennada Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diintu sannad walba.

QOD. 6aad

1. Xadka ugu sarreeya ee Xushmada Qareennada waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxwayne, iyadoo la dhegeeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

2. Inta laga soo saaraayo xeerka kor ku tilmaaman, waxaa lagu dhaqmayaa tacriifada ku qoran warqado tilmaameedka lam. 1, 2, 3, 4 iyo 5 ee ku lifaaqan sharciga Qareennada.

QOD. 7aad

1. Waxaa la tirtiray qodobada 1 iyo 16 ee sharciga lam. 85 ee 21/10/1975 iyo dhamaan lifaaqyada sharcigaas ~~kor ku saabsan hawlaha iskaashatada~~ Qareennada.

2. Waxaa kaloo la tirtiray meel kasta oo sharciga kor ku tilmaaman gudihiisa ku qoran yahay ereyga ISKAASHATADA.

QOD. 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Jannaayo 1986.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Maxamed Siyaad Barre